XUQUUQDA SHAQO QABASHO EE QOFKA MAGANGELYODDOONKA AH

Marka aad tahay magangelyoddoon waxaad shaqayn kartaa oo kaliya, haddii xuquuqdaada shaqo qabasho ay shaqaynayso. Marka aad raadsanayso shaqo, waa in aad ogaataa, in xuquuqdaada shaqo qabasho ay billaabatay iyo inkale, ayna wali shaqaynayso.

Qofka magangelyoddoonka ah waa in uu u sheegaa shaqo bixiyihiisa, haddii ay xuquuqda shaqo qabashadu ka dhammaato.

Si dhakhso ah ugu sheeg shaqo bixihiyahaada, haddii xuquuqdaada shaqo qabasho ay dhammaato. Dambi ayaad ku mutaysnaysaa ama ku galaysaa haddii aad shaqo qabato adigoo aan heysan xuquuqda shaqo qabashada.

Xagee baad ka heleysaa warbixinta ku saabsan xuquuqdaada shaqo qabshada?

- Marka qofku uu codsanaayo magangelyada ayaa waxaa la siinayaa qoraal ku saabsan ”warbixinta xuquuqda shaqada”, taasoo uu ka helayo warbixinta la xiriirta waqtiga xuquuqda shaqo qabashadu ay billaabanayso.
- Dhammaadka xuquuqda shaqo qabashada waxaa lagu sheegaa go’aanka. Go’aanka oggolaanshaha waxaa lagu sheegaa xuquuqda shaqo qabasho ee ku salaysan sharciga degganaanshaha dalka.
- Cinwaanka bogga internetka ee laga heli karo warbixinta ku saabsan xuquuqda shaqo qabashada migri.fi/turvapaikanhakijan-tyonteko-oikeus

Goorma ayay xuquuqda shaqo qabashada billaabanaysaa?

Waxaad samayn kartaa shaqo mushaar laga helo saddex ama lix bilood gudahood, oo ka soo billaabanaysa markii aad codsatay magangelyada.

- Xadku waa saddex bilood, haddii aad u dhiibtay hawlwadeennada dowladda baasaboor ama dukuminti kale oo dhab ah oo shaqaynaya

- Xadku waa lix bilood, haddii aadan dhiibin ama tusin dukuminti safarka (matkustusasiakirja)

Sidee ayuu codsiga dib u cusboonaysiinta magangelyada saamayn ugu yeelanayaa xuquuqda shaqo qabashada?

Haddii aad dib u cusboonaysiisay codsiga magangelyada wixii ka dambeeyay 1.6.2019, waxaa kugu waajib ah in aad sugto saddex illaa lix bilood kahor inta aadan markale shaqo gelin. Codsiga dib u cusboonaysiinta waxaa loola jeedaa codsiga magangelyada ee uu dalbado qofka magangelyoddoonka ah, kaasoo hore u helay ugu yaraan hal go’aan oo codsiga magangelyoddoonka ah.

- Xadku waa saddex bilood, haddii aad u dhiibtay dhiibtay hawlwadeennada dowladda baasaboor ama dukuminti kale oo dhab ah oo shaqaynaya

- Xadku waa lix bilood, haddii aadan dhiibin ama tusin dukuminti safar (matkustusasiakirja)

Haddii aad gudbisay codsiga dib u cusboonaysiinta kahor 1.6.2019, waad sii wadan kartaa shaqadaada, islamarka aad gudbiso codsiga dib u cusboonaysiinta kaddib.

Illaa iyo intee ayeey shaqeyntu sii socon kartaa?

Marka aad go'aanka hesho waa in aad hubisaa , in xuquuqdaada shaqo qabashadu ay wali shaqaynayso iyo inkale. Waxaana arrinkaan laguugu sheegayaa go'aanka.

Ma waaxd heshay go'aan oggolaansho ah?

Haddii aad heshay go'aan oggolaansho ah, xaaladahaas intooda badan waad sii wadan kartaa shaqadii aad ka heysay Finland gudaheeda. Waxaad ka hubin kartaa kaarka ciqaamadda iyo go'aankaba, in aad xaq u leedahay in aad ka shaqayso Finland gudaheeda iyo inkale.

Ma waxaad heshay go'aan diidmo ah?

Haddii go'aanku uu yahay mid diidmo ah, xuquuqdaa shaqo qabasho waxay u dhammaanaysaa sida hoos ku xusan:

- Haddii go'aanku uu ahaa mid dhaqangelin u diyaar ah, taasoo loola jeedo in adiga waddanka lagaa saari karo sida sharciga waafaqsan kahor 1.6.2019, xuquuqdaada shaqo qabasho waxaa ay ku egtahay illaa iyo inta go'aankaagu noqonayo mid sharci ahaan dhaqangal ah.

- Haddii go'aanku uusan ahayn mid dhaqangal u diyaar ah kahor 1.6.2019, xuquuqdaada shaqo qabasho waxaa ay dhammaanaysaa marka go'aanku uu yahay mid dhaqangal u diyaar ah, taasoo loola jeedo marka si sharciga waafaqsan adiga dalka lagaaga saari karo. Waxaa arrinkan laguugu sheegayaa go'aanka Waaxda socdaalka.

Goorma ayuu go'aanku yahay mid sharci ahaan dhaqangal ah?

Go'aanku wuxuu sharci ahaan dhaqangal ku yahay xaaladaha soo socda:

- Waxaa lagu siiyay go'aankii, mudadii racfaan qaadashada ee 21-ka maalmood ahayd ee laga soo bilaabo maalinkii go'aanka laguu sheegayna, uma aadan gudbin maxkamadda maamulka wax racfaan qaadasho ah.

- Waxaa lagu siiyay go'aankii maxkamadda maamulka, mudadii racfaan qaadashada ee 14-ka maalmood ahaydna wax racfaan ah oo go'aankaas ku saabsan uma aadan gudbin maxkamadda sare ee maamulka.

- Waxaad ka heshay maxkamadda sare ee maamulka oggolaanshaha racfaanka ee codsigaaga iyo go'aanka racfaankaaga.

Goorma ayuu go'aanku yahay mid dhaqangal u diyaar ah?

Marka uu go'aanku yahay mid dhaqangal u diyaar ah, adiga waxaa lagaa saari karaa dalka. Go'aanka ayaa lagu sheegaayaa marka uu go'aanku yahay mid dhaqangal u diyaar ah.

Waxaad si hubsasho leh uga akhrisan kartaa bogga internetka, marka adiga waddanka lagaa saari karo.
Warbixin dheeraad ah waxaad ka heleysaa: migri.fi/kaannyttaminen

Shaqo bixiyaha waxaa ku waajib ah in uu hubiyo arrinka ku saabsan xuquuqda shaqo qabashada

Shaqo bixiyaha waxaa ku waajib ah in uu hubiyo arrinka ah, in qofka shaqaalaha ee ajnabiga ah laga doonaayo in uu haysto sharciga degganaanshaha ee qofka shaqaalaha ah ama in uusan u baahnayn wax sharciga degganaanshaha ah.

Qofka shaqo bixiyaha ah waxaa uu ku mutaysanayaa dambi ama sharci jabin, haddii uu si ulakac ah ama taxaddar la'aan ah uu u shaqo geliyo qof shaqaale ah oo aan lahayn xuquuqda shaqo qabashada.

Shaqo bixiyuhu wuxuu shaqaalaha ka hubin karaa xuquuqdiis shaqo qabasho, isaga oo arrinkaas weydiiya qofka shaqaalaha ah.
Sidoo kale waxaa qofka shaqo bixiyaha ah uu dalban karaa shahaadada xuquuqda shaqo qabashada ee qofka magangelyoddoonka ah.
Tilmaanbixinta arrinkaas ku saabsan waxaa laga helayaa bogga internetka ee migri.fi/todistuspyynnot